

Ogaanshaha Xaaladaha Hiddo-sideyaasha (Rapid Genome Sequencing, rGS)

Rapid Genome Sequencing (rGS) (Somali)

Dhakhtarka ilmahaagu waxa uu ku taliyay baadhitaanka hidde-sidaha ee loo yaqaanno ogaanshaha xaaladaha hiddo-sideyaasha (rapid genome sequencing, rGS). Baadhitaankani waxay eegayaa isbeddelada DNA-ka ee keeni kara ama wax ka geysan kara xaalad caafimaadeed.

Ku Saabsan Hiddo Barashadaada

Jidhkayagu waxa uu ka kooban yahay balaayiin dhismo oo loo yaqaan unugyo. Unug kastaa waxaa ku dhex jira DNA. Qaybo yaryar oo ka mid ah DNA-ga ayaa loo yaqaannaa hidde-sideyaasha. Hidde-sideyaashu waxay jidhkeena u sheegaan siduu u kori karo, u kobci karo, iyo sida uu u shaaqayn karo. Waxaa ku jiraan qiyaastii 20,000 oo hidde-sideyaal ah gudaha DNA-ga aadanaha. Hidde-sideyaasha dhammaystiran, ama walxaha hidde-sidaha, ee ku jira unugga ama noole ayaa loo yaqaannaa hayaha dhamaan macluumadka hiddaha noolaha ama **genome-ka**.

Isbeddellada ku dhaca DNA-yadeena ayaa saameyn ku yeelan kara caafimaadkeenna. Qof kastaa wuxuu ku dhashay isbeddello DNA oo u gaar ah. Qaar ka mid ah isbeddellada DNA-ga ayaa sababa ama gacan ka geysta cudurrada, laakiin badidooda kama sidaas ma ahan. Dhakhtarka ilmahaaga ayaa u maleynayaa in wax badan ka ogaanshaha isbeddellada DNA-ga ee ilmahaagu ay ka caawin doonto iyaga inay si wanaagsan u daryeelaan ilmahaaga.

Sida Loo Sameeyo Baadhitaanka

Baaritaanka rGS-gu wuxuu ka eegayaa isbeddellada DNA-ga gudaha muunada dhiigga ama candhuufa (candhuuf). Dhiiggu waa muunada ugu fiican ee rGS-ku. Haddii muunadda candhuufa la isticmaalo, baadhista waxay qaadan kartaa waqtii dheer in la dhammaystiro.

Natiijooinka rGS-ku waxaa si fiican loo fahmayaan marka shaybaadhka uu ka heysto muunado ilmahaaga iyo labada waalid ee dhalay. Tani waxay ka caawinaysaa shaybaadhka inuu ogaado isbeddelada DNA-ga ee ka yimid waalidiinta iyo kuwa ku cusub ilmahaaga. Isbeddellada DNA-ga ee sharxi kara xaaladda caafimaadeed ee ilmahaaga ayaa la soo sheegaa. Waxaad filan kartaa inaad ku hesho natiijooyinka 8 maalmood gudahood.

Natiijooinka Baadhitaanka

Natiijooinka baadhitaankani wuxuu noqon karaa mid:

- **Togan ah:** Isbeddelka(lada) DNA-ga ee sababa ama gacan ka geysta xaaladda caafimaadeed ee ilmahaaga ayaa la ogaaday inuu hiddaha ku jiro. Natiijooyinka togani ayaa laga yaabaa inay u sheegaan kooxda barashada hidaha wax badan oo ku saabsan:
 - Ogaanshaha cudurka ee ilmahaaga.
 - Qaar, ama dhammaan, sababaha calaamadaha ilmahaaga.
 - Waxa ay tahay in la fisho iyo daawaynada suurtogalka ah.
- **Taban ah:** Ineysan jirin wax isbeddello DNA ah oo cudur keena. Si kastaba ha ahaatee, waxaa weli jiri kara sabab xaalad caafimaadeed ah oo uu hiddahu ku keenay ilmahaaga oo aan lagu helin baadhitaankan.
- **Aan la hubin:** Isbeddellada hidde-sidaha ayaa unuga ku jiraan kuwaas oo laga yaabo ama aan laga yaabin inay gacan ka geystaan xaaladda caafimaadeed ee ilmahaaga.

Kadib Baadhitaanka

Dhakhtarka ilmahaaga iyo/ama la taliyaha barashada hidahaaga ayaa kaala hadli doona natiijooinka baadhitaanka. Waxaa suurtogal ah in baadhitaan dheeraad ah lagula taliyo. Haddii aad su'aalo qabto, fadlan weydii.